

Tusaha Sicirka Badeecadaha

Febraayo 2020

Warbixin kooban

Dhammaan cabirka qeybaha uu ka kooban yahay Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) Bisha Febraayo, 2020 ayaa noqday 114.13, marka la barbardhigo Bishii Janaayo, 2020 oo uu ahaa 113.14 heerka cabirka ee TSB.

Farqiga Isbedelka u dhexeeya labada bilood, Janaayo, 2020 iyo bishii Febraayo, 2020 ayaa sare u kacay 0.88 boqolkiiba. marka la barbardhigo hoos u dhac bille ah oo dhan -1.31 boqolkiiba ee bishii hore Janaayo 2020. Majirin wax sare u kac bille ah oo muuqday inta lagu guda jiray Bisha Febraayo 2020.

Guud ahaan, sicir bararka sanadlaha ah ee 12ka bilood (Febraayo 2019 iyo Febraayo 2020) ayaa muujinaya in dhammaan qeybaha TSB uu hoos u dhacay 3.06 boqolkiiba ee heerka cabirka sicir bararka, Marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha 12ka bilood (Janaayo 2019 iyo Janaayo 2020) oo ahaa 3.21boqolkiiba .

Shaxda 1: Heerka Sicir Bararka, TSB Febraayo 2020 (Dec 2014 = 100)


Tusaha Sicirka Badeecadaha, Febraayo 2019	
Tusaha Bisha Febraayo	114.13
Tusaha Bishii hore Janaayo	113.14
Tusaha sanadkii hore Bishii Febraayo (2019)	110.75
Isbedelka bilaha ah (%boqolkiiba)	0.88%
Isbedelka heerka sicir bararka ee sanadlaha ah boqolkiiba (Febraayo 2019 iyo Febraayo 2020)	3.06%

Heerka Sicir Bararka marka oo eego TSB

Percent change over twelve months

Tixraaca TS

Index = 100 @ December 201



Source: Directorate of National

Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) Febraayo 2020

Heerka Sicir Bararka: Dhammaan Qeybaha TSB, Febraayo 2020

Heerka sicir-bararka Bisha Febraayo 2020 waa isbedelka boqolleyda sanadka ee Tusaha sicirka badeecadaha (TSB) mudadii laba iyo toban bilood ahayd, laga soo bilaayo **Febraayo 2019** ilaa **Febraayo 2020**.


Dhammaan qeybaha TSB uu ka koobanyahay ayaa hoos u dhacay 3.06 boqolkiiba laba iyo tobankii bilood ee la soo dhaafay, **Febraayo 2019** ilaa **Febraayo 2020**, marka la barbardhigo isla laba iyo tobankii bilood ee la soo dhaafay, **January 2019 –January 2020**, oo ahaa 3.21 boqolkiiba.

Dhammaan qeybaha TSB is bedelka billaha ah ayaa sare u kacay 0.88 boqolkiiba Bisha Febraayo 2020, marka labarbar dhigo Bishii hore ee Janaayo 2020 oo uu hoos u dhacay -1.31 boqolkiiba.

War bixin bileedka Bisha Febraayo 2020 ee ku saabsan Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) iyo faahfaahinta xili-waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa websitka Agaasinka <http://www.dns.org.so> & Twitter @DNS_MoPIED

Dhamaan Qeybaha TSB iyo Qeybaha la doorday

Index = 100 @ December 2014



Source: Directorate of National

Sicir bararka qeybo ka mid ah Badeecadaha, febraayo 2020.

Sicir bararka qeybaha **Cuntada iyo Cabitaanada, guryaha, biyaha, korontada iyo gaaska**

Cuntada lagu karsado ayaa ah kuwa ugu badan badeecadaha la isticmaalo oo dhan uguna qiimo badan.

Cuntada iyo Cabitaanada ayaa qiimahooda billaha ah ayaa hoos u dhacay 1.50 boqolkiiba. Tan ayaa waxaa sababay sare u kac ku yimid qeybo ka mid ah Cuntada Quutal daruuriga. Natijjo ahaan, sicir bararka sanadlaha ah qeybaha cuntada iyo cabitaanada ayaa qiimahoodu kor dhay 6.38 boqolkiiba (Febraayo 2019-Febraayo 2020), marka loo eego sicirbararka sanadlaha ah (Janaayo 2019-ilaa janaayo 2020) uu ahaa 3.91 boqolkiiba.


Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaaska, cuntada lagu karsado, ayaa sare u kacay 0.47 boqolkiiba intii lagu guda jiray Febraayo 2020, marka la barbardhigo Bishii Janaayo 2020 ee uu ahaa 0.14 boqolkiiba.

Sicir bararka sanadlaha qeybtan ayaa hoos u dhacay -3.11 boqolkiiba Bisha Febraayo 2020, marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah ee Bishii Janaayo 2020 uu gaaray -2.16 boqolkiiba.

Qeybaha ugu waa weyn ee isbedelka Sanaddle ah (TSB)

Jsaantuska 1: Sicir bararka sanadlaha ee dhamaan qeybaha; febraayo 2020 (Dec 2014 = 100)

War bixin bileedka Bisha Febraayo 2020 ee ku saabsan Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) iyo faahfaahinta xili-waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa websitka Agaasinka <http://www.dns.org.so> & Twitter @DNS_MoPIED



Qeybaha ugu weyn ee sicir bararku Kordhay (+):

Cuntada iyo cabitaanada ayaa sicirkoodu kordhay 6.38 boqolkiiba 12kii bilood, (Febraayo 2019 ilaa Febraayo 2020). Sare u kaca ugu badan ayaa ka dhashay qiimaha cuntada oo gaaray (3.99 boqolkiiba). Kororka ayaa waxa sababay qiimaha khudaarta oo gaaray 16.06 boqolkiiba.

Dharka iyo Kabaha ayaa bisha febraayo 2020 sicirkooda sare u kacay 10.95 boqolkiiba Marka la barbardhigo sare u kac sanadlaha oo gaaray 11.98 boqolkiiba bishii Janaayo 2020. Sare u kaca ugu badan ayaa ka dhashay qiimaha dharka oo gaaray (+11.80 boqolkiiba), marka loo eegaayo sare u kac ku yimid dharka caruurta oo noqday (20.27 boqolkiiba).

Qiiimaha Gaadiidka ayaa muujiyey hoos u dhac yar oo Sanadlaha oo gaaraya 2.23 boqolkiiba Bisha Febraayo 2020, marka loo barbardhigo 4.67 boqolkiiba Janaayo 2020. inta badan sare u kac ayaa ka yimid *kala iibsiga Gawaarida* oo gaaray (+5.22boqolkiiba).

Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu hoos u dhacay (-):


Madadaaladda, Hawo bedelehada & dhaqanka ayaa sameeyey hoos u dhac sanadlaha oo gaaray -4.04 boqolkiiba bisha Febraayo 2020, marka la barbardhigo hoos u dhac Sanadlaha -3.91 boqolkiiba Janaayo 2020. Hoos u dhacan waxaa sababay qiimaha agabka soo dhaweynta, wax lagu duubo iyo dib usoo saarista codadka iyo sawirada oo gaaray (-4.58 boqolkiiba).

Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaaska ayaa la diiwaan geliyey hoos u dhac sanadlaha oo dhan -3.11 boqolkiiba bisha febaayo 2020, marka la barbardhigo hoos u dhac sanadlaha -2.16 boqolkiiba ee bishii Janaayo 2020. Hoos u dhaca waxaa sababay qiimaha Biyaha iyo adeegyada yar yar oo hoos u dhacay -5.88 boqolkiiba.

Adeegyada dheeraadka ah ayaa waxa laga diiwaan geliyey hoos u dhac dhan -2.46 boqolkiiba bishii Febraayo 2020, marka loo eego hoos u dhaca laga diiwaan geliyey bishii Janaayo 2020 oo dhan -3.42 boqolkiiba . hoos u dhaca waxa inta badan u sabab ah alaabta sida gaarka loo isticmaalo iyo kuwa la isku qurxiyo.

War bixin bileedka Bisha Febraayo 2020 ee ku saabsan Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) iyo faahfaahinta xili-waqtiiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa websitka Agaasinka <http://www.dns.org.so> & Twitter @DNS_MoPIED

Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu billaha kor u kacay Bisha Febraayo 2020 (+)



Cuntada iyo cabitaanada. Qiimaha cuntada sameyey kor u kac yar oo dhan 1.50 boqolkiiba intii lagu guda jiray Bisha Febraayo 2020 halka -2.69 boqolkiiba uu ahaa bishii Janaayo 2020, kor u kaca ugu weyn ayaa ka dhashay qiimaha qudaarta 7.92 boqolkiiba.

Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu billaha hoos u dhacay Bisha Febraayo 2020 (-)

Guud ahaan ma jiraan wax muujinaya hoos u dhac ah oo muuqda oo la taaban karo qeybaha uu ka kooban yahay TSB.

Shaxda 2: Isbedelka tusaha sicirka ee qeybaha badeecadaha febaraayo 2020 ee habka (COICOP)

Habka kalasaarida caalamiga ee COICOP	TSB Weight	Febaraayo 2019	Janaayo 2020	Febaraayo 2020	Boqolkiiba Isbedelka Bisha Janaanyo 2020 iyo Febaraayo 2020	Boqolkiiba Isbedelka Bisha Febaraayo 2019 iyo Febaraayo 2020
Dhamaan qeybaha TSB	100.00	110.75	113.14	114.13	0.88	3.06
Cuntada & Cabitaanada caadiga ah	46.04	112.65	118.06	119.83	1.50	6.38
Tubaakadda	1.25	138.02	136.81	137.08	0.20	-0.68
Dharka & Kabaha	5.03	109.85	121.89	121.89	0.00	10.95
Guryaha, Biyaha, Korontada & Gaaska	23.41	107.22	103.40	103.88	0.47	-3.11
Agabka Guryaha	2.93	104.50	102.72	102.95	0.22	-1.48
Caafimaadka	5.00	118.27	119.28	119.62	0.29	1.14
Gaadiidka	3.77	108.26	110.57	110.57	0.00	2.13
Isgaarsiinta	2.80	96.66	96.32	96.32	0.00	-0.35
Hawo bedelehshada & dhaqanka	1.00	102.79	98.54	98.54	0.00	-4.14
Tacliinta	4.00	101.54	107.75	107.75	0.00	6.11
Maqaayadaha & Hoteelada	2.00	134.97	135.92	136.61	0.50	1.21
Alaabaha yaryar & Adeegyada	2.77	107.65	103.99	105.00	0.97	-2.46

Ogeysiis:

Tusaha sicirka Badeecadaha waa sahan ku saabsan badeecadaha iyo adeegyada ay isticmaalan qoysaska caadiga aha. Xogta sahanka waxaa la soo ururiyaa Todobaadka kowaad iyo kan sedexaad ee bilkast. Sicirk badeecadaha iyo adeegyada waxaa laga soo ururiyaa goobaha ganacsiga ee afart suuq ee ugu waa weyn magalada Muqdisho.


Soosaarida tan xigta

Tixraaca Sicirka Badeecadaha (TSB), Maarso 2020 waxaa la baahindoonaa 15th Abriil 2020. Wixii faah faahin intaasi dheer ee ku saabsan (TSB) iyo xogaha kale ee rasmiga kala soco Xafiiska Istaatistiskada, Fadlan booqo Bogeneena rasmiga ah ee <http://www.dns.org.so>

Lifaaqa 1aad: Dhamaan Qeybaha 'TSB' – ka qeyb qaata heerka sicir-bararka Bishii Febraayo 2020 marka loo Eego COICOP ka.

Dhamaan Qeybaha TSB

Qeybaha ka Qeyb qaata (%) sicir bararka marka loo qeybiyo Habka TSB



Source: Directorate of National Statistics

Lifaaqa 1aad wuxuu bixiyaa falanqeyn kusaabsan heerka sicir bararka ee Bisha oo loo qeybiyey iyo is barbardhiga qeybaha, ayadaoo loo eegayo qeybaha COICOP loona soo bandhigayo sida ay u kala saameyn badan yihiin (ka qeyb qaadashooda) dhamaan qeybahaha 'TSB' ka.